



Guddoomiyaha Waxbarashada ee Guerrero wuxuu la-taliye ka noqday ururka la yiraa “Big Brothers Big Sisters”

Guddoomiyaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland Guadalupe Guerrero wuxuu noqon doonaa la-taliye ururka la yiraa Big Brothers Big Sister Columbia Northwest organization. Munaasabada ka dhacday Lefbanka Annex dhawaan ee ay qabsadeen BBBS ayaa Guddoomiye Guerrero wuxuu ku tegay booqasho aan la sii shaacin, isaga oo isla goobtii ku ballanqaaday inuu noqonayo “Big,” waxa ay la-taliyaashu u yaqaanaan.

“Dhammaanteen waan ka faa’iidnaa nolosheena la-taliyaasha, gaar ahaan sanadaha aan koroneyno; waan ogahay waan sameeyey,” ayuu yiri Guerrero. “Iyada oo aan wali ku cusub ahay magaalada Portland iyo dugsiyada degmadaba, waxaan rajeynayaa in aan fool-ka-fool ula shaqeeyo caruurta yar yar kuwaasi oo ka mahadceli doona fursad lagu siinayo waqtiga dheeraad ah iyo tallooyinka.”

Waxa kale oo kala qeybgalay Guddoomiye Guerrero Taliyaha cusub ee Ciidanka Booliska Danielle Outlaw, oo iyaduna si lama filaan ah u ballanqaaday inay la-taliye u noqoneyso. Waxa ay ka mid noqon doonaa 450 la-taliye oo hore uga jiray nawaaxiga Portland kuwaasi oo caawiya caruurta dhibaatooyinku soo wajahaan fool-ka-fool,” sidaas waxaa yiri ururkan BBBS.

Ururkan BBBS Columbia Northwest waxa la aasaasay sanadkii 2002, iyaga oo xiriir la leh urur weynaha Big Brothers Big Sisters ee Maraykan, ururkaas oo u addeega caruur ka badan 8,500 oo deegaanka ah. Talo-bixintani waxa ay kor u qaadi boqolkiiba 91 qalin-jabinta dugsiyada sarre ee lala talinayo.